Macluumaad

Quseeya Kirystaha iyo Kiraystayaasha Ajnabiga ah

somali

Caritasverband für das Bistum Magdeburg e.V.
caritas
Die Stadtfelder
Wohnungsbaugenossenschaft Magdeburg-Stadtfeld eG
WOBAU
Wohnungsbaugenossenschaft Otto von Guericke eG
MWG
ottostadt magdeburg

Mudanyaal iyo Marwooyinka qaaliga ah,

Jarmalka waxaa ka jira Xeer iyo Dhaqan gooni ee Kiraystaha, tahay in ey ilaaliyaan.Warqaddaan Macluumaad Kiraystayaasha ayaa leydinku tilmaamayaa iyo leydinku sharxayaa, sida aad u heshaan Aragti gooni ah.

Haddii ey dhacdo in aad u baahantaan Caawinaad iyo taagyeero ku saabsan Arrintaan, waxaad ka heleesaan Bogga ugu dambeeyo ee Warqadda Macluumaad Kiraystayaasha,Taas aad ka heleesaan Cinwaanada Qofka aad la xiriirin laheeden ama ka sheegayo Goobta kula talin laheed

1. Heshiiska kirada iyo ku wareejinta ayadoo Qoraal ah

Heshiiska Kirada iyo ku wareejinta Qoraalka ah waa waraaqdo muhim ah, waayo waxaa ku qoran waxi aad Xaq u leedahay iyo Waajibka ku saaran, marki aad kiraysato. Warqadda ku wareejinta Guriga waxaa lagu qorayaa Xaalka u suganyahay Guriga iyo Tiriyaha Korontada inta uu yahay, Biyaha Qabow iyo Kuleelka ah iyo Kululeeyaha.Taasi waa muhim marki hadhow la xisaabayo Kharjka kuugu baxay

Marki Guriga laguugu wareejinayo waxaa lagu siinayaa waxi Qoraal ah oo ku siinayo Qofka ama Shirkadda Guriga iska leh. Iska eeg Warqadda ku wareejinta Guriga in ey Sax tahay Fadlan keydi iyo ilaali Warqadda ku wareejinta Guriga iyo Heshiiska Kirada, sida aad markasta u eegto waxi aad Xaq u leedahay iyo waajibka ku saaran.

Hadii aad Guri Shirkadda ka kireysaneeso ama Lacag Hordhac bixineeso, waxey ku xiranyahay Heshiiska in aad Lacagta marka kowaad bixisid.
Haddii aad tahay Qof Lacagta Ceerta qaata oo ka qaata Xafiiska Bulshada iyo Guryaha ama Jobcenterka, waxaad awood u leedahay Arji in aad u qoratid Qolada ku qaabishan adigoo qoranayo Arji ah in ey la wareegaan Lacagta Shirkadda iyo Lacagta Hoirdhaca ah.Waxaa dhici karto in laguu ogolaado Lacagta ayadoo Deen ah taasi waxey macaanigeeda tahay in aad Lacagta u celissa Qolada ku qaabishan

2. Haddii aad meel kale iska diwaangareeso ama Cinwaanka bedesho

Fadlan ilaali Waajibka Sharciga, kaas oo ah cinwaan kasta aad bedesho in aad Hayado ama Xafisyo kale nooc ah iska diwaangareesaa.
Sida aan si hubaal ah u ogaano in lagu heli karo

Haddii aadan Xafiiska leeska diwaangareeyo ama Xafiiska Bulshada iska diwaangareen 2 Usbuuc gudahooda, sida uu yahay Xeerka § 19 ee Sharciga Diwaangareeska Wadankaan waxaad ku tala gashaa in laguugu ganaaxi karo Lacag

Mikiilaha Guriga waxuu ku siinayaa **Hal Warqad oo caddayneeso Guriga lagu siiyay**, Taas, oo qasab ah in aad u geyso Xafiiska Diwaanka
Ballan waxaad ka heli kartaa Xafiiska Bulshada (Bürgerbüro) **www.magdeburg.de**.

2.1. Iska diwaangareeska Xafiisyada ku qaabishan

Hayadaha, oo ka qaadato taagyeerada, waa in aad akhbaar gelissa, taasi waxaa ka mid ah

- Xafiiska Bulshada (Bürgerbüros) sida aad u bedesho Cinwaanka ku qoran Warqadda aqoonsiga ama, Warqadda Gaariga
- Xafiiska Bulshada iyo Guryaha (Sozial-und Wohnungsamt)
- Xafiiska Dhalinyarada (Jugendamt)
- Jobcenter
- Xafiiska Canshuurta (Finanzamt)

2.2. Iska diwaangareeska Hayadaha kale

Cinwaanka waa in aad Qof kasta aad la leedahay Xiriir Ganacsi ah
la socodsiisa khaas ahaan

- Bankiyada (Sparkasse, Postbank, Volksbank o.a.). Haddii ey jiraan Agagaarka Guriga aad degentahay Bangiyo kale, waxaad ka codsan kartaa in Koontadadda lagu wareejiyo Bankiga cusub
- Kindergarten iyo Iskuulka Caruurta
- Shirkadda ama Qofka aad u shaqeesid
- Qareenka
- Shirkadaha Teleefonada
- Telifishinka iyo Qolada Interneetka
- Ururada, Shirkadaha iyo Hayadaha, aad la gashay Heshiis in aad Lacag bixisid
- Ururo iwm
- Shirkadaha Caymiska, sida caymiska haddii aad jirato, caymisyada kale, Caymiska Gaariga

2.3. Iska diwaangareeska Heshiisyada aad gashay

Haddii aad leedahay Heshiis Telefon iyo Internet, waa in aad Shirkadda ku qaabishan, la socodsiisa Cinwaanka cusub

2.4. Arji u qoro Boostada sida Warqadaha laguugu soo gudbiyo

Waxaad u qoran kartaa Laan kasta ee Boostada si Online ah sida Boostada laguugu soo gudbiyo.Warqadaha laguu soo dirayo aan weli aqonn Cinwaanka cusub, markaas boostada ayaa isla markii kuu soo gudbineeso

Codsiga ah in laguu soo gudbiyo Boostada ma aha mid **Lacag laáan ah**. Kharajka lich bilood laguu soo gubinayo Boostada wayxuu yahay 19,90 €, 12 Bilood 26,90 €.

Halkaan ayaad Arjiga soo gudbinta Boostada u qoran kartaa
www.nachsenden.info

3. is Diwaangareen

3.1. Shirkadda Korontada

Iska diwaangareen Shirkadda Korontada.Sida iskaaga diwaangareeso waxaad u bahantahay Tiriyaha korantada halka uu joogo, taas oo ku qorayo Mihiilika Warqadda ku wareejinta Guriga, Shirkada qarkood, sida Shirkadda, WOBAU Magdeburg mBH ayaga ayaa ku diwaangareenayaan

3.2. ARD ZDF Deutschlandradio Adeegga Shirkadda

Haddii aad leedahay Telifishin, Radio iyo /Computer Internet leh ama Mobil, **waa Qasab** in aad bixisid adeegga Shirkadda iska diwaangaree iyo bixi Lacagta adeegga. Haddii aad ka qaadato Lacag Jobcenter, Cayrta iyo Qolada guryaha (Sozial-und Wohnungsamt, BAföG, Lacagta cayrta III, BAB haddii aad wax baraneeso oo lagu caawino (Berufsausbildungsbeihilfe), Lagu kabo, Arjiyada waxaad ka heleesaa Xafiiska Bulshada (Bürgerbüro) Xurraynta Lacagta Telefishinka waxey la socotaa Warqadda Ogolaashada ee ka timaado Jobcenter ama Sozial-und Wohnungsamt

Faaf faahin dheeraad waxaad ka heleysaa **www.rundfunkbeitrag.de**

3.3. Internet iyo Telefishinka

Telefishinka iyo Internet waxaa la geleysaa heshiis Lacag ah Shirkad. Haddii gashid Heshiis waxaa lagaa doonayaa Lacag, aad adiga iska bixineeso. Haddii aad dooneesid in aad Heshiiska ka baxdo, waa iska joojin kartaa adigoo ilaalinayo Waqrtiga joojinta

3.4. Caymiska Alaabta Guriga / Caymiska haddii aad wax jajabiso

Caymiska Alaabta Guriga waa muhim, waxuu daafacayaa Alaabta Guriga, sida Allabta Guriga taala, iyo isticmaalka shayga Guriga. Haddii Guriga gubto ama Biyo galaan, tuug jabsado, si ulakac loo jajabiyo, Baraf dhegex ah dhaawaco waxaa bixinayo Kharajka Caymiska.
Haddii ey Dhibaato kuugu dhacdo aan laheen caymis waa in aad adiga kharjka iska bixisaa

Caymiska haddii Shay jajabiso si aan ulakac aheen. waxuu kaa daafacayaa waxi ka imaan karo Nolol maalmeedka

Ka taxadir: **Qofki Qasaaro geesato, ayada aa ka masúul ah si buuxda!**

Muhim!

Qofki Heshiis la gala Caymis,waa in uu ka taxadiraa, Waqtiga uu soconayo Caymiska iyo Joojinta Waqtiga uu ku egyahay

4. Haddii Guriga Dhibaato ka timaado

Haddii Dhibaato ka timaado Guriga ama Mareenka Guriga, haddii wax ka maqanyihiin ama dhaawac gaaray, Fadlan la xiriir Mikiilaha iyo ka Codso Caawinaad iyo taagyeero. Xogta Xiriirka Mikiilaha waxaad ka heleesaa Warqadda Heshiiska Kirada. Dhibaatada adag sida, haddii Biyo mareenka ama Tubada jabtay caadi ahaan waa in uu Makiilaha/ Gaargaarka deg degga ah u sheegaa.
Haddii Dhibaatadaas timaado waxaa jira Waraaqado ku dhegen Gelintaanka Guriga oo ku qoran Lambarada Telefoonka



5. Bedelka Dhismaha Guriga, Bedelka Guriga aad degentahay

Haddii aad dooneesid Dhismaha Guriga in aad bedeshid, aad dooneesid in aad wax ka bedesho (sida, Dhigintaanka Laminat ama Dhgaxa derbiga lagu dhejiyo ...) waa inaad kahor la socodsiisa Makiilaha oo aad Ogolaasho ka heshaa.Waxaa jira Fulinta shaqadaas Heer sare ey ku xirantahay Shaqadaas, oo la doonayo in aad ilaalisid, Tilaabada la qaadin lahaa haddii aad Guriga ka baxeeso oo ey noqoto Guriga sidiisa hore in aad ku soo celiso

6. Haddii aad guureesid

Ilaali Waqtiga **ka bixinta** Guriga
Oo caadi ahaan ah Sadex Bilood,
Iyo Korontada, telefoonka, Telefishinka-iyo Interneetka,
Waqtiga waxaad ka heleesaa Warqadaha Heshiiska Shirkadaha.
Haddii aad qaadato Lacagta Kaalmada ee Jobcenter ama Lacagta Ceerta qaadato, waxaa Qasab ah

Kirada laguu fidiyay inta aan Hashiis gaarin in Xafiiska Cayrta tustaa,
Sida ey si macquul ah u baaraan. Kadib waxaad codsan kartaa in ey la wareegaan Kirada iyo bixiyaan Lacagta aad ku guureeso
Haddii aadan laheen Sharci joogta ah, ama heesatid.

Sharciga Dulqaadashada (DULDUNG) ama Warqadda la siiyo Qaxootida (Aufenthaltgestattung) waxaa loo baahanyahay in aad ka hesho Ogolaasho qoraal ah Xafiiska Ajnabiga **ama** Cayrta iyo Qolada qaabishan Guryaha

Ka taxadir:

Haddii aad Kiro Heshiis la gashay adigoon ka helin Ogolaasho xafiiska, waxaa dhici karto in laguu diido Lacagta kirada iyo Tan guurintaanka

7. Xeerka Guriga

Fadlan ka taxadir Xeerka Guriga. Jarmalka waxaa la ilaaliyaa Xeerar gooni ah marki aad adiga iyo Dariskaada isla nooshihiin
Marki lagu siinayo Heshiska Guriga ayaa lagu siinaya Warqadda Xeerka Guriga ey ku qoranyihiin Xeerar kala nooc ah

a) Ka taxadir Qaylada!

- Telifishinka iyo Raadiyaha waa in uu Codkooda markasta ku ekaadaa Qolka mar kasta
- Waa in aad iska ilaalisaa Shaqo guri oo qaylineeso (Sida Huufarka, Ku garracid Buris iyo Muusiko) Waqtiga Nashasada. laga bilaabo 13.00 Saac ilaa 15.00 Saac iyo 22.00 Saac iyo 07.00 Saa
- Axadda iyo Maalmaha Fasaxa waa in wax Qaylo ah la sameen
- Waqtiga Fasaxa ama marki ey kulmaan dhowr Marti ah, oo joogaya wax ka badan 22.00 Saac, waa in aad u sheegtaa Dariska kale iyo ka codsataa iney ogolaadaan

b) Hagaaji iyi Nadiifi!

Kiraysta kasta waa in uu ilaaliyaa, in Mareenka Guriga, Dhulka hoose ee Alaabta la dhigto ama Kor Goobta Alaabta la dhigto, Garaashka.-iyo Goobta Alaabta la dhigto in ey Nadiif ahaadaan.
Gurayaha qaarkood waxay qortaan Shirkadd Guriga nadiifisa. Kharajka ka soo baxa waxaa loo qaybinayaa Kiraystayaasha Guriga.
Haddii ey noqotay in ey Nadaafadda ka masúul yihiin Kiraystayaasha,
Waxaa jira Blaan Nadaafadda Qoran, taasi waa in aad ogaataa.

Jarmalka waxuu ka cayaarayaa **Recycling** Dowr ween. Taasi waxey u fiicantahay Degaanka iyo dhimeesaa Kharajka ku baxa Qashinka.

Qashinka Guriga waa in aad Goobta Qashinka loogu tala galay gelisaa.
Iyo ka taxadirtaa in aad Qashinka ku tuurto meesha loogu tala galay:

- **Caagga** Madow waxaa loogu talay galay Qashinka Guriga
- **Yellow** waxaa loogu tala galay Balaastikada iyo Baakayada
- **brown** waxaa loogu tala galay waxi dabeeci ah
- **buluug** waxaa loogu talagalay Waraaqdaha

Daboolka Qashinka waa in markasta dabool naadaa, sida Urka kasoo baxayo looga maarmo

Ka taxadir Mareenka Biyaha in u Qashin xirin iyo Suuliga!

Ka taxadir:

Raashinka soo haray, Dharka iyo waxyaabo kale in aadan ku ridin Suuliga!

Tuuridda Qashinka waa ween:

Tuuridda Qashinka aadan u baahneen iyo Alaabta kaa jabtay, waa in aad Arji gooni ah u qoratid Shirkadda qaabishan Qashinka (Abfallwirtschaftsbetrieb) Magdeburg.

Waxaad awood u leedahay Gurigaada sanadki 2 jeer ilaa iyo 2 m^3 ama
Sanadkii hal mar 4 m^3 in lagaa qaado adigoon wax Lacag ah bixin
Is diwaan gareeska iyo Qashinka lagaa qaadayo waxaad ku tala gashaa qiyas 4 Usbuuc

Alaabta lagaa qaadayo waxaa dhigeesaa banaanka marki lagaa soo doonayo!
Arjiyada waxaad ka heli kartaa:
www.magdeburg.de/Leben-in-Magdeburg/Umwelt/Abfall

c) Amaanka ka taxadir!

- Ha dhigin Jaran jarada wax Alaab ah, sida ey u banaanaato Jidka Baxsiga iyo Gar gaarka, haddii kale waxaad qatar gelineesaa haddii (Lacala Deb Dhaco) Noloshaada iyo Dadka kula degen

- Albaabka Dhismaha waa in la xiraa, sida ey Dad kale u soo gelin-

- Sida Debka looga maarmo, waa Manuuc in Balkoonka iyo Goobta Banaan ee Guriga Grill lagu sameeyo

- Ku cabid Sigaar Goobta lagu kulmo sida Jaranjarada, Dhulka hoose, Kor Goobta alaabta lagu keydiyo lama ogola-

d) Raadiyaha iyo Telefishinka- iyo Anteenada

Haddii aad ka fiirsato Satiliit Barnaamijyada Wadankaada, waxaad u baahanta in Saxanka Satiliitka la suro, laakiin waan in aad Arji Ogolaasho Qoraal ah u qorataa Shirkadda Guriga ama Qofka iska leh
Ogolaashada Qofka Guriga iska leh waxaa ku xiran Shuruudo, Goobta iyo sida aad u dhigi laheed Saxanka Satliitka

e) Dhaqaaleenta Xoolo

Xoolaha (Sida Eyga, Bisadda ama Xoolo kale) waxaad laguu ogolyahay haddii aad Ogolaasho ka heesato Qofka Guriga kaa kireeyay

8. Kharajka Korontada, Biyaha iyo Biyaha kulul

Waa in Kharajka Tamarta dhaqaaleesa, sida Kharjka kaaga yeraado iyo Degaanka u caawinto. Isticmaalka Korontada, Biyaha yo Biyaha kulul, waa Qasab in aad bixisid waxi kuugu baxay

a) Kuleeliyaha iyo Hawo siinta Guriga

- Dhowr jeer hawada u fur Guriga Maalintii. waa in aad Daaqdda Gebigeeda furtaa iyo Kuleelaha inta aad Guriga leerta siineeso waa in aad geesa Daafaca Qabawga Xiddigga Frostschutz (Sternchen).
  Iska ilaali Daaqdda si joogta ah wax yar u furato, waxaa dhici karto

- Cagaar in uu ka dhasho. Qol kasta waa in aad isku si loo kuleeyaa Xataa Qolka aan badi la isticmaalin, waa in uu ka yaraan 16 Grad Haddii si isku mid ah loo qaybiyo Tamarta. Markaas ayuu Kharjka Kaa yaraanayaa

b) Biyaha

- Qubeyska sida Roobka ah ayaa ka dhaqaalo badan kan Dabaasha
- Marki aad cadayaneeso iyo marki aad Garka xiireeso waa in ey Biyaha si joogta ah u socon
- Mayrinta Allabta Cunada haddii biyaha si joogta ah u socdaan Waxay keeneesaa Kharaj badan. Ku Shub Kodka Biyo kadib meer Alaabta. Iska ilaali Raashin qabow ah oo adag ama in aad Raashin Ku qaboojiso Biyo socda.

c) Korontada

- Nalka waa in ka darnaadaa, kaliya Qolka add joogtid
- Waxaa lagu farayaa in aad isticmaashid Nalka wax dhaqaaleeya.
- Qalabka (Sida Telifishan, Radio, Computer, HiFi-Qalabka ...)
  Fadlan gebigooda demi (haka dhigin Standby-Modus), Haddii aadan isticmaaleen. Isticmaalka Saldhigyada Korontada oo la demin karo ama Saldhigyada hawada laga demi karo ayaa ku haboon.
- Waxaa jira dhowr Nooc, oo lagu ogaado inta Koronto aad Isticmaashay, haddii Tamar badan kuugu baxday aan aheen, inta Horey loo qiyaasay, waa in aad **Lacag dheeraad bixisaa**.
  Lacagtaa waa in aad adiga bixisaa, xattaa haddii aad Kaalmo Ka qaadato Jobcenter ama Lacagta Ceerta qaadato

Sharaxaad Kelmedaha:

Xisaabta Kharajka ku baxayo Tamarta (Betriebskotenabrechnung)

Kharjka Tamarta waa mid joogta ah (sida biyaha., Kuleyliyaha, - Nadaafadda Guriga iyo Jidka, Caymiska Guriga, Canshuurta iwm.), Kharjkaas oo laga doonayo Qofka Dhulka ama Guriga iska leh. Heshiiska Kerida ayay ku jirtaa in uu Kiraysta Kasto Bishii Qayb bixiyo. Sanad kadib ayaa hadana Xisaab la samaynayaa, oo la xisaabayaa inta Kharaj kuugu baxday Natiijada Xisaabta waxaad ka arkeysaa Warqadda ku qorantahay Xisaabta. Hadduu Kiraystaha Isticmaalkiisa ka batto, inta uu horey u dhiibay Waa in uu Lacag dheerad ah bixiyaa. waxi kuu soo noqda waa laguu celinayaa

Caymiska (Versicherung)

Qofka Caymiska ku jira waxuu bixinayaa si joogta Lacagta Caymiska Shirkadda Caymiska waxey bixineysaa Khasaaraha aad geysatay Sida Caymiska Guriga ama Caymiska kale.

Iskaashato (Genossenschaftsanteil)

Iskaashatada waa Shirkad khaas ah. Sida aad ugu noqoto Xubin
Iskaashatada waa in aad iibsataa Qayb Iskaashatada.-
Waxay ku xirantahay Guriga inta uu la egyahay Iibsashada Qayb Iskaashatada.

Lacagta la hormariyo (Kaution)

Lacagta la hormayriyo waa qayb ka mid ah Kirada, Lacagtaa Qofka Guriga iska leh ayaa la wareegayaa haddii Kirada bixin weeso ama wax bur buriso. Lacagtaa waxaa la bixiyaa marki Furaha lagu siinayo

Heshiiska Kirada (Mietvertrag)

Jarmalka waxuu yahay Heshiiska Kirada Labada dhinac-
oo Heshiis gaaray oo aad Guriga degenaan karto adigoo la baxayo Kiro, Heshiiska Qofka (Guriga leh) waajib ku tahayt, Qofkaan kale (Kiraystaha) waxi uu kiraystay in uu siiyo, Kiraystaha in uu bixiyo Kirada lagu heshiiyay.

Ku wareejin Guriga ayadoo Qoraal ah (Übergabeprotokoll)

Brotokoolka ku wareejinta waa Wax qoraal ah oo tilmaamayo Xaalka uu ku suganyahay Guriga marki Guriga laguugu wareejinayo Iyo ku wareejineeso marki aad Guriga ka baxeeso. Isticmaalka Warqadda ku wareejinta waxey tahay macaanigeeda Haddii leesku Af garanwaayo Xaalka Guriga marki laguugu wareejinayo ama aad ka baxeeso

Tirada Korontada iyo Biyaha (Zählerstand)

Sida loo tiriyo Isticmaalka Korontada iyo Biyaha, Biyaha kulul, waa in markasta la aqriyaa tirada ku qoran Qalabka xisaabiya Badi waxey ku yeelaan Hoos Dhulka (Biyaha Suuliga).

Caddayn in Guriga laguugu wareejiyay (Wohnungsgeberbestätigung)

Caddaynta in Guri laguugu wareejiyay waxey tahay in aad iska diwaangareeso Xafiiska leeska diwaangareeyo (Einwohnermeldeamt), Waa Waraaqd muhim ah, taas oo ku siinayo marki aad gaartiin Heshiis Makiilaha.

ARD ZDF Radiyaha Jarmalka (ARD ZDF Deutschlandradio)

Waa Shirkad iska leh Dowladda, taas oo Guri kasta ka dooneesa Xisaab Lacag oo goán.

Waqtia: Ogaysiiska (Kündigungsfrist)

Waqtiga Ogaysiiska waxuu yahay, Waqtiga ogaysiiska Iyo Waqtiga oo dhamaanayo Heshiiska inta u dhexeesa.



2.Daabicidda / Sebtembar 2018 © Dhamaan Xuquuqda la qoondeeyay
Dieses Projekt wird gefördert vom Ministerium für Inneres und Sport Sachsen-Anhalt.

Herausgegeben von:
Landeshauptstadt Magdeburg | Sozial- und Wohnungsamt | Abt. Zuwanderung
Caritasverband für das Bistum Magdeburg e. V. | Interkulturelles Beratungs- und Begegnungszentrum
Wohnungsbaugesellschaft Magdeburg mbH
Wohnungsbaugenossenschaft Magdeburg-Stadtfeld e G
Wohnungsbaugenossenschaft Otto von Guericke e G
MWG-Wohnungsgenossenschaft e G Magdeburg

Xaqqa Qolada soo saartay / Xaqqa adeegga Qolada soo saartay
Shaacinta waxaa halkaan ku qoran iyo diyaarinta Macluumaadka waxaa ka dambeeyo Sharciga aasaaska Jarmalka iyo Sharciga daaficinta Adeegga. Nooc kasta oo koobi ah, Bedel, ka shaqeen, keydin iyo nooc kasta isticmaal ah oo ka baxsan Assaaska waa in uu ka heshaa Ogolaasho Qoraal ah ee Dadka soo saaray. Koobi aan la ogoleen / keydis ama diyaarin Macluumaadka waa mamnuuc.

Xaggee ka helaa Caawinaad? / Cinwaano muhim ah:

Tallo iyo Macluumaad

Caritasverband für das Bistum Magdeburg e.V.
Interkulturelles Beratungs- und Begegnungszentrum
Karl-Schmidt-Str. 5 c
39104 Magdeburg
Tel.: 0391 408 05 14 oder 0391 408 05 15

Verbraucherzentrale Magdeburg
Breiter Weg 32
39104 Magdeburg
Tel.: 0391 543 99 79

Mieterverein Magdeburg
Otto-v.-Guericke-Str. 6
39104 Magdeburg
Tel.: 0391 561 91 55 oder 0391 541 01 09
E-Mail: info@mvmd.de

Bürgerbüros der Stadt Magdeburg
Bürgerbüro Mitte: Leiterstr. 2 A
Bürgerbüro Ost: Tessenowstr. 15
Bürgerbüro Süd: Salbker Chaussee 67
Bürgerbüro West: Bruno-Beye-Ring 50
Bürgerbüro Nord: Lübecker Str. 32

La talis Kiraystayaasha lagu leeyahay Kiro iyo Lacagta Korontada

Sozial- und Wohnungsamt Magdeburg
Wilhelm-Höpfner-Ring 4
39116 Magdeburg
Tel. 0391 540 34 08

Deutscher Paritätischer Wohlfahrtsverband
Wienerstr. 2
39108 Magdeburg
Tel.: 0391 629 33 73

Internationaler Bund e.V. Magdeburg
Walther-Rathenau-Str. 30
39104 Magdeburg
Tel.: 0391 739 10 89

AWO Kreisverband Magdeburg e.V.
Thiemstr. 12
39104 Magdeburg
Tel.: 0391 406 80 31

Arjiyada la wareegga Lacagta Kirada iyo marki aad guureeso

Jobcenter Landeshauptstadt Magdeburg
Otto-v.-Guericke-Str. 12 a
39104 Magdeburg

Sozial- und Wohnungsamt Magdeburg
Wilhelm-Höpfner-Ring 4
39116 Magdeburg
Tel.: 0391 540 34 08

Adeegga Alaabta Guriga

AQB gGmbH
Morgenstr. 10
39124 Magdeburg
Tel.: 0391 72 72 60

GISE
Schönebecker Str. 56
39104 Magdeburg
Tel.: 0391 40 95 107

Guryaha

WOBAU – Wohnungsbörse
Breiter Weg 117 a
39104 Magdeburg
Tel.: 0391 610 44 44

Wohnungsbaugenossenschaft
Otto von Guericke eG
Scharnhorstring 8 / 9
39130 Magdeburg
Tel.: 0391 726 12 00

Wohnungsbaugenossenschaft
Magdeburg-Stadtfeld eG
Peter-Paul-Str. 32
39106 Magdeburg
Tel.: 0391 568 49 10

MWG-Wohnungsgenossenschaft eG
Magdeburg
Letzlinger Str. 5
39106 Magdeburg
Tel.: 0391 569 84 44

Faaf faahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa Bogga Online ee la taliska Ajnabiga
www.willkommen-in-magdeburg.de